



13-Mar-2020

Qoysaska Sharafta leh ee Portland iyo xubnaha bulshada,

Xaaladda ku saabsan coronavirus-ka cusub, COVID-19, ayaa si dhakhso leh isu beddelaya. Waxaan sii wadnaa kormeerka xaaladda iyo inaan la tashanno degmooyinka kale ee degmada iyo mas'uuliyiinta gobolka. Natiijooyinka ka soo baxay awgii, Dugsiyadda Guud ee Portland waxay ku darayaan liiskeenna taxadarka si looga hortago faafitaanka fayrasku ku dhex leeyahay bulshadeena.

Waxaan rabnaa inaan iskuuladayada u furnaano inta ugu macquulsan maxaa yeelay waxaan ognahay inay beesheena ku tiirsan tahay inaan barbaarino carruurtooda inta waalidku shaqeynayaan. Waxaan sii wadnaa inaan diirada saarno sii wadista waxbarashada iyadoo aan ilaalinayno jawiga iskuulka si ardaydeenna iyo shaqaalaheennu u ahaadaan kuwo caafimaad qaba oo aamin ah.

Maadaama fayruuska uu ku faafayo xiriir qof-ka-qof ah, waxaan sii wadaynaa inaan qaadno taxaddarrada noocaas ah sida nadaafadda la xoojiyay; dejinta borotokool loogu talagalay arday kasta ama shaqaale xanuunsan; xaddiditaanka galaangalka dadweynaha ee shirarka ardayda; iyo dib u dhigista ama joojinta waxqabadyada degmada ka dhexeeya iyo safarada dibedda. Waa kuwan taxaddarro cusub oo aan maanta ku darnay:



- Dhammaan shirarka waalidka-macallinka waa la joojinayaa si loo yareeyo soo-gaadhista shaqaalaha ee viruska. Dugsiyadeenu waxay gaari doonaan jadwalka kulanka taleefanka toddobaadyada soo socda.
- Waxaan dib u dhigeynaa diiwaangelinta dugsiiga barbaarinta iyo xanaanada sanad dugsiyeedka 2020-2021 ilaa inta si nabada dib loo bilaabayo. Waqtigan xaadirka ah, waxaan sii wadaynaa diiwaangelinta ardayda u baahan inay isdiiwaangeliyaan sanad dugsiyeedka hadda jira. Si kastaba ha noqotee, haddii aad xannuunsato ama ilmahaagu buko, dib u dhig diiwaangelinta ilaa aad ka bogsato.
- Iskuulada waxaa laga codsanayaa inaay qaban shirarka iskuulka ama shirarka kale ee ardayda.
- Laga bilaabo Isniinta, waxaan qorsheyneynaa inaan u adeegno dhammaan cuntooyinkeena horay loo diyaariyey, oo ay ku jiraan kuwa salarka.
- Ururka Maine Maamulayaasha Maine ayaa dib u dhigay xilligii cayaaraha guga ee dugsiiga sare illaa iyo 27-ka Abriil.
- Dhammaan fasalada kobcinta shaqsiyadeed ee Portland Adult Education waa la joojiyay si loo yareeyo soo-gaadhista bulshada ee aan daruuriga aheyn ee iskuulladayada. Dhammaan fasalada kale waxay usii socon doonaan sidii loo qorsheeyay waqtigan xaadirka ah.
- Haddii loo baahdo, kormeeraha iskuulka ayaa xiri doona iskuullada kadib la tashiga Maine CDC iyo wakaaladaha kale ee



gobolka. Iyada oo ku xidhan duruufaha, go'aanka ayaa si dhakhso leh u iman kara ogaysiiskana wuxuu u bixi doonaa si la mid ah kan loogu sameeyo ogaysiiska cimilada daran.

Kormeeraha guud wuxuu ogeysiin doonaa ardayda, waalidiinta, mas'uuliyiinta, iyo dugsiga in aan biloownay barashada fog oo dhammaan howlaha manhajka iyo manhajka ka baxsan la kansali doono illaa ogeysiis dambe.

Dhammaan taxadarradan waxaa loo habeeyay inay xaddidaan ardayda iyo shaqaalaha soo-gaadhista cudurka, laakiin waxaan u baahan nahay wada-shaqeynta qoysaska iyo bulshada si aan uga dhigno inay shaqeeyaan. Fadlan la soco in waalid kasta oo aan ku qanacsanayn ubadkooda u diraya dugsiga waqtigaan waa inuu la xiriiraa iskuulkooda waana maqnaasho cudurdaar leh.

Waan sii wadi doonaa inaan idinla socodsiino waxyaabaha ku saabsan fayraska. Fadlan ku sii wado taxadarka dareenka guud: guriga joog marka aad jirantahay, dabool qufaca iyo hindhisada oo gacmaha si joogto ah u dhaq. Haddii aan dhamaanteen wada shaqeyno, waxaan si guul leh u gaari doonnaa yoolkeenna ugu weyn ee ah sii wadista waxbarashada ardayda iyadoo aan



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS
prepared & empowered

hubinayno in ardayda iyo shaqaalaheennu ay ahaadaan kuwo caafimaad qaba oo aamin ah.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan fayraska waxaa laga heli karaa Xarunta Macluumaadka ee 'COVID-19 PPS' oo ku taal bartayada internetka.

Xavier Botana

Kormeeraha Guud

P430- SOM Corona Letter 3-13-2020